

Dukumiintiga Tasmada

Ujeedada

Isbadallada ku dhaca xeerka cuntada ee Minnesota (Xeerarka Minnesota, cutubka 4626) oo dhaqan galay Janaayo 1, 2019 waxaa ku jira isbadallo wayn oo lagu sameeyay shuruudaha qaababka baakadaynta oksijiintu ku yar yahay (ROP) ee xarumaha cuntada tafaariiqda ah ee ruqsada ka haysta xeerarka Minnesota, cutubyada 28A iyo 157. Tasmadaan waxaa loogu talagalay inay ka caawiso shaqsiyaadka maamulaaya ama kormeeraaya sharciyadana siinaaya xarumaha cuntada ee ku yaala Minnesota inay fahmaan shuruudaha ROP ee ku jira Xeerarka Minnesota, cutubka 4626. Dukumiintigu badal uma ahan kumana lamaanaanayso sharciyada jira, laakiin waxay tusmo ka bixinaysaa farsamooyinka midaysan ee joogtada ah.

Aasaaska

Adeegsiga qaababka ROP ee goobaha cuntada ayaa leh faa'iidada siinta mudada ay qaanadaha saarnaan karaan cuntooyin badan waayo waxay leedahay ilmo aragtay cuntada haleeya oo caadiyan ah nool kubcana. ROP ayaa sidoo kale bixin karta faa'iido la xariirta waqtiga iyo kaydka shaqaalaha, xakamaynta qaybta iyo joogtaynta tayada.

Shaxda soo socota ayaad ka helaysaa qaar kamid ah qaababka ROP iyo tusalayaasha laga heli karo xarumaha cuntada tafaariiqda ah.

Qaababka ROP (ROP methods)	Qeexitaanka qaabka ROP	Tusaalayaasha
Baakadaynta buufinta (Vacuum packaging) (VP)	1. Cuntada waxaa la gashaa baakad la ogolaaday loona sameeyay ROP 2. Hawada ayaa qaab farsamo looga saaraa baakada 3. Bacda ayaa dusha kore laga sajal gareeyaa si hawo la'aan u ahaato gudaha bacda. 4. Cuntada bacda ku jirta ayaa la gashaa talaagada ama baraf dhaliye.	• Hilib la daaweeyay • Hilib ceeriin ah, digaag ceeriin ama khudaar ceeriin ah • Burcadka qaar oo lagu sameeyo laguna baakadeeyo warshadaha cuntada sameeya ee sharciyaysan ayadoon wax maadooyin ah lagu darin xarunta cuntada tafaariiqda ah (arag Xeerka Cuntada ee FDA 2013: Farqada 3 – Cuntada 3-502.12 si aad u hesho liiska burcadka la ogol yahay) • Hawo ka saarida baakada burcadka jilicsan LAMA ogola • Hawo ka saarida baakada kaluunka cusub ama la dhalaaliyay LAMA ogola

Qaababka ROP (ROP methods)	Qeexitaanka qaabka ROP	Tusaalayaasha
Baakadaynta cuntada la karshay kadibna la qaboojiyay (Cook-chill packaging) (CC)	1. Hanaanka karinta ayaa ka saara cuntada oksijiinka, asagoo abuuraya aaga ogsijiintu ku yar tahay 2. Cuntada kulul waxaa la gashaa baakad la ogolaaday loona sameeyay ROP 3. Bacda ayaa la sajal gareeyaa ama aad loo xiraa kahor intaan cuntadu gaarin heerkulka 135°F 4. Cuntada ayaa degdeg loo qaboojiyaa kadibna la gashaa talaagada	• Maraq jilicsan • Maraqa • Digirta la dubay • Baasto maraq leh • ShurbadSoups
Baakadaynta Sous vide (Sous vide packaging) (SV)	1. Cuntada ceeriinka ah ama qayb ahaan la karshay ayaa lagu baakadeeyaa bac bilaa hawo ah oo la ogol yahay loona naqshadeeyay ROP 2. Cuntada waxaa la karshaa ayadoo ku jirta bacda 3. Cuntada la karshay ayaa degdeg loo qaboojaa kadibna la gashaa talaagada, ama ayadoo kulul la cunaa	• Hilib jiir ah • Marag hilib leh oo adag • Digaag leh maraq ama maceeyaal

Qaababka kale ee ROP waxaa ku jira baakadaynta wax laga badalay (MAP) iyo baakadaynta cimilada maaraysan (CAP). Cimilada baakada cuntada ayaa wax laga badalaa si huurintu uga duwanaato hawada. Noocyadaan baakadaynta waxaa badanaa lagu sameeyaa warshadaha cuntada sameeya.

Tilmaanta

Qorshayaasha bar koontaroolka muhiimka ah ee qiimaynta iyo xakamaynta adag ee khatarta (HACCP) ayaa qasab u ah inta badan qaababka ROP ee lagu sameeyo goobta cuntada tafaariiqda ku iibsha. Marka loo raaco sida ay u qoran yihiin, qaababka ROP ee Xeerarka Minnesota, qaybta 4626.0420 ayaa bixinaysa xakamaynada kobaca iyo/ama samaynta sunta *Clostridium botulinum* iyo *Listeria monocytogenes* oon lahayn farac. Haddii shuruudaha xeerka cuntada ee ku salaysan sayniska aan la raacin si loo xaqiijiyo badqabka cuntada, cimilada lagu abuuray gudaha baakada iyo cabirada cuntada ee loo adeegsado qaababka ROP ee aan qumanayn ayaa abuuri kara xaalado kordhinaaya khatarta caafimaadka dadwaynaha ee ka imaanaysa *C. botulinum* iyo *L. monocytogenes*. Xeerka cuntada ee Minnesota ayaa bixinaaya sadex dookh oo lagu adeegsano qaababka ROP oo badqab leh:

- Markay leedahay farac, ayadoo la raacaayo qorshaha HACCP ee la ogol yahay (4626.0420, qaybta A)
- Bilaa farac, raacida qorshaha HACCP ee la ogol yahay kaasoo buuxinaaya cabirada la sheegay (4626.0420, qaybaha B ilaa E)
- Bilaa farac, ku dhaqanka shuruudaha waqtiga/heerkulka iyo calaamadaynta ee aan qasab ka dhigayn qorshaha HACCP (4626.0420, qaybta F)

Hennepin County Environmental Health

479 Prairie Center Drive Eden Prairie, MN 55344

612-543-5200 | www.hennepin.us/envhealth

Reduced oxygen packaging_Somali_HC_6-25

Content courtesy of the [Minnesota Department of Health](http://www.mn.gov)



Gudbinta iyo ansixinta dib u eegista qorshaha HACCP

Xeerarka Minnesota, qaybta 4626.1730 ayaa qasab ka dhigaaya in ruqsadluhu ama codsaduhu uu soo gudbiyo qorshaha HACCP ee qaababka ROP uuna ogolaansho ka qaato maamulka sharciyaynta kahor intuuusan samayn shaqada ROP. Qorshaha HACCP waa inuu buuxshaa cabirada Xeerarka Minnesota, qaybta 4626.0420, qaybaha B ilaa E iyo 4626.1735. Maamulka sharciyaynta ayaa ansixin doona qorshayaasha ee buuxsha shuruudaha.

Kormeerka – Xaqiijinta

MDH ayaa xaqiijin doonta in xarun ay raacayso iyo in kale qorshaheeda HACCP inta lagu jiro kormeerada. Kormeeradu waxay diirada saarayaan dookhyada cuntada iyo dib u eegista diiwaannada, dood ku saabsan hanaanada la adeegsanaayo, iyo qalabka ROP ee la adeegsaday.

Fulinta amarka

Haddii la arko qaababka ROP oon la ogolaan inta la wado kormeer, xaruntu waa inay joojisaa ROP. Xarunta iyo maamulka sharciyaynta ayaa intaas kadib ka wada shaqayn kara go'aaminta talaabooyinka toosinta ah ee ku haboon si loo xaliyo qaababka aan la ogolaan. Dookhyada qaar ee talaabooyinka toosinta ah waxaa kamid ah:

- In la waafajiyo qorshaha HACCP ee la ogolaaday kahor intaan dib loo bilaabin ROP.
- Dirista qorshaha la saxay si loo xaqiijiyo loona ansixiyo kahor dib u bilaabida ROP.
- In wax laga badalo qaababka ROP si loo buuxsho shuruudaha Xeerarka Minnesota, qaybta 4626.0420, farqada F kahor intaan ROP dib loo bilaabin.
- Inaad joojiso ROP ka lagu isticmaalo xarunta.

Faraca

Inta badan xaaladaha, farac ayaan looga baahnayn goobta cuntada ee samaynaaya qaababka ROP.

Farac ayaa loo baahan yahay marka xarun cunto ay doonayso inay adeegsato qaabka ROP oon ahayn kuwa ku qoran Xeerarka Minnesota, qaybta 4626.0420. Si loo helo difaaca caafimaadka dadwaynaha oo ku filan, hanaanka ROP waa in lagu daraa xakameeyaasha kobaca iyo abuurista sunta ka dhalata *C. botulinum* iyo dhalashada *L. monocytogenes*.

Maamulka sharciyaynta ayaa bixin doona aqoonsiga faraca haddii badalka lasoo jeedshay ee shardigu ay bixinayso difaaca caafimaadka dadwaynaha oo u dhigma ama ka balaaran cabirada ku qoran xeerka cuntada ee Minnesota. Waa masuuliyad saaran mulkiilaha ruqsada ama codsadaha inuu soo gudbiyo codsiga faraca ama cusboonaysiinta faraca si waafaqsan Xeerarka Minnesota, qaybta 4626.0415 uuna helo ogollaansho kahor intuuusan samayn ROP. Xeerarka Minnesota, qaybta 4626.1690 ayaa qeexaaya habraacyada codsiga faraca. Xeerarka Minnesota, qaybta 4626.1710 ayaa qeexaaya habraacyada cusboonaysiinta faraca.

Dukumiintiyada tixraaca ah

[Tusmada Dhismaha Goobta Cuntada \(PDF\)](#)

Sharciyada khuseeeya

Sharciga Minnesota, cutubka 157 – Ruqsadaynta (MDH)

Hennepin County Environmental Health

479 Prairie Center Drive Eden Prairie, MN 55344

612-543-5200 | www.hennepin.us/envhealth

Reduced oxygen packaging_Somali_HC_6-25

Content courtesy of the [Minnesota Department of Health](#)



Sharciga Minnesota, cutubka 28A – Ruqsadaynta (MDA)

Xeerarka Minnesota, cutubka 4626.0020 – Bayaanka Codsiga iyo Qeexitaanka

Xeerarka Minnesota, cutubka 4626.0415 – Shuruudaha Gaarka ah ee Ka shaqaynta Faraca

Xeerarka Minnesota, cutubka 4626.0420 – Baakadaynta Oksijiinta La yareeyay ee Bilaa Faraca ah; Shardiga

Xeerarka Minnesota, cutubka 4626.1690 – Codsiga Faraca; Habraacyada

Xeerarka Minnesota, cutubka 4626.1695 – Codsiga Faraca; Shuruudaha Go'aanka

Xeerarka Minnesota, cutubka 4626.1700 – Shuruudaha Faraca; HACCP; Ogaysiiska Go'aanka

Xeerarka Minnesota, cutubka 4626.1710 – Cusboonaysiinta Faraca Xeerarka Minnesota, cutubka 4626.1725 –

Mawduucyada Qorshaha iyo Sifooyinka

Xeerarka Minnesota, cutubka 4626.1730 – Marka qorshaha HACCP loo baahan yahay

Xeerarka Minnesota, cutubka 4626.1735 – Mawduucyada Qorshaha HACCP

Xeerarka Minnesota, cutubka 4626.1787 – Kormeerada Ku salaysan Shaqada iyo Khatarteeda

Su'aalaha Inta badan la Isweydiiyo

Waa maxay shuruudaha u adeegsiga ROP kaluunka ceeriinka ah?

Maadaama C. botulinum si joogto ah looga helo kaluunka ceeriinka ah, kaluunka waa in lagu hayaa baraf kahor, inta lagu jiro iyo kadib ku baakadaynta ROP. Kaluunka la dhalaaliyay waa in lagasoo saaraa baakada ROP ama la furaa baakada si aysan ugu jirin cimilo oksijiintu ku yar yahay sida ku cad Xeerarka Minnesota, qaybta 4626.0380, farqada E.

Xeerarka Minnesota, qaybta 4626.0420, farqada F ma qabanaayo kaluunka waayo kaluunka waa in baraf laga dhigaa kahor, inta lagu jiro yio kadib ROP.

Cuntada TCS ee diyaarka u ah in la cuno, ee qaboow ma lagu baakadayn karaa bacaha loo ogolaaday loona sameeyay ROP?

Haa, marka cuntada TCS ee diyaarka u ah in la cuno, oo qaboow loo baakadeeyo si ahayn **bilaa hawo**. Cuntada qaboow ee diyaarka u ah in la cuno, laguna shubay bacda kadibna la sajal gareeyay bilaa hawo maaha ROP. Midkoodna HACCP iyo faraca looma baahna. Cuntada TCS ee diyaarka u ah in la cuno, ee talaagada ku jirta ee lagu hayay xarunta wax ka badan 24 saac waa in lagu qoraa taariikhda. Cuntada TCS ee lagu diyaarshay xarunta waxaa la hayn karaa todobo maalmood ayadoo lagu haynaayo 41° F ama ka hooseeya.

Tusaale: Goobta cuntada ayaa karinaysa kadibna qaboojinaysa lugaha digaaga, ku guraysa bac kadibna bacda xiraysa bilaa hawo. Tani maaha ROP. Lugaha digaaga ee bacda la gashay oo bisil ayaa ah cunto TCS ah waana in lagu qoraa taariikhda.

ROP ma loo adeegsan karaa cuntada TCS, diyaarka u ah in la cuno ee aan la dawayn, oo qaboow?

May, cuntada TCS, diyaarka u ah in la cuno ee aan la dawayn, oo qaboow waa inaan lagu baakadayn **hawo**.

Tusaale: Xarunta cuntada ayaa diyaarinaysa, karinaysa kadibna qaboojinaysa lasagna, kadibna cadad ayadoo ah gelinaysa baco, ka saaraysa hawada, sajal garaynaysa bacaha kadibna haynaysa lasagna wax ka badan 48 saacadood. Qaabkaan

wuxuu kordhinayaa khatarta cudurka cuntada ka dhasha asagoo abuuraaya xaalado taageeraaya kobaca *C. botulinum* iyo *L. monocytogenes*. Codsiga faraca ee habraacan waa la diidi doonaa.

Shardi nooc ee ah ayaan midkoodna HACCP iyo farac laga doonayn si loo adeegsato qaababka ROP ee Ilaalinta Waqtiga/Heerkulka si loo fayodhowro Cuntada (TCS)?

Xeerarka Minnesota, qaybta 4626.0420, farqada F ayaa ka reebaysa cuntooyinka talaagada la gashay, ee ROP kuwaas oo markasta laga saaro baakada 48 saacadood gudahood marka baakada laga saaro shuruudaha waayo kobaca iyo abuuranka sunta *Clostridium botulinum* iyo *Listeria monocytogenes* mudadaas kooban gudaheed looma arko khatar wayn oo cuntooyin noocaas ah ku jirta.

Tusaale: Goobta cuntada ayaa karinaysa roosto, gelinaysa bac loo ogolaaday loona sameeyay ROP kadibna bacda sajalaynaysa. Baakada waxaa lagu qoray waqtiga iyo taariikhda la baakadeeyay. Cuntada bacda ku jirta ayaa degdeg loo qaboojiyay ilaa 41°F ama ka hoos ayadoo la adeegsanaayo barafka biyaha kadibna waxaa lagu hayay heerkulka 41°F ama ka hoos. Baakada ayaa la fura 48 saacadood gudahood marka roostadu kumasii jirayso jawiga oksijiinta laga yareeyay.

Tusaale: Goobta cuntada ayaa hilibka digaag ceeriin ah oo lagu daray maraq gelinaysa bac loo ogolaaday loona sameeyay ROP kadibna bacda sajalaynaysa. Baakada waxaa lagu qoray waqti iyo taariikhda la baakadeeyay. Cuntada bacda ku jirta waxaa lagu hayaa 41°F ama ka hoos. Cuntada ayaa lagu karshaa sous-vide kadibna si degdeg ah ayaa loogu qaboojiyaa heerkul dhan 41°F ama ka hoos ayadoo la adeegsanaayo barafka biyaha. Baakada ayaa la fura marka digaagu kumasii jirayso jawiga oksijiinta laga yareeyay. Hanaanka dhan waa inuu qataa ugu badnaan 48 saacadood.